# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### Kal-fadhigii 44aad Fadhigii 31aad

**Axad 17 January 2021 Furmay:- 10:21AM**

**Quraanka: -** Md Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaynu u balan sanayn doodda Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka, mudanayaasha doonaya inay dooda ka qayb qaataan ha is qoraan.

**Md Xaamud Cisamaan Cigaal (2min 41sec):-** Bismailaahi raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Xildhibaanada, saxaafada iyo Xoghaynta waxaan ku salaamayaa Asalaamu Calaykum Warax matulahi Wa barakaatu.

Waxaan jeclahay inuu aan inagu Golaha joogay, sharciyada marka la soo gudbiyo sida runta ah ka kaliya ee I deeqay ee aan is idhi si wacan ayaa looga soo shaqeeyey, aniga oo u mahadcelinaya Guddida Khayraadka dabiiciga ah ee soo gudbisay soo jeedimahooda iyo sida fiican ee ay uga soo shaqeeyeen aad iyo aad ayaan u bogaadinayaa waanan u mahadcelinayaa.

Waxa kaliya ee aan jeclahay maadaama oo ay caynkaas tahay inagana haatan wakhtigeenii uu taagan yahay oo aynu doonayno in aynu faaruqino halkan inta badan la inagu canaantay ee la yidhi waad ku raagteen oo xeerkan uu yahay xeer aad iyo aad u qiimo leh uu yahay in aynu qaadano soo jeedimaha Guddidu ay soo jeedisay oo aynu soo fudaydino oo aynu sidaas ku ansixino.

Waxa kale oo aan doonayaa in aan soo jeediyo. Waxaynu ogsoonahay marka laga hadlayo khayraadka dabiiciga in had iyo jeeraale Beelaha Meeshaa degaa ay mid waliba tidhaa halkan anagaa iska leh, dawladu waa in ay sugtaa nabadgelyada halkaas ka socota iyo shirkadaha baadhaya haddii Alle yidhaahdo oo aanay nabadgelyadu aanay jabin. Intaas ayaan ku soo gebo-gabaynayaa.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye (3min 9sec):-** Bismailaahi raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Xildhibaanada, Saxaafada iyo shaqaalaha waxaan ku salaamayaa dhammaantiin Salaanta islaamka, Asalaamu Calaykum Warax matulahi Wa barakaatu.

Sida Xildhibaan Xaamud Sheegay Guddidu aad iyo aad ayey u soo shaqeeyeen. Anigu xeerkan waxaan ka bedeli doonaa oo ku badan kalmadaha carabiga ah, oo aad ugu badan. Kalmadaha aan soo qaatay waxa ka mid ah:

**"Shirkada Waalidka ah"** waxaan ka dhigay **"Shirkada Hooyada ah" waayo shirkada waalid ah waxa iska dhala laba qof, laakiin kani waah al qof.**

**"Goobta heshiiska" waxaan** ka dhigay **"lakabka Hoose"**

**"Tasiilaada'** Waxaan ka dhigay **"Hawl Fududayn"**

**Qodobka 3aad: "Nidaaminta"** Waxaan ka dhigay **" Hagaajinta"**

**"Ruqsadaha"** Waxaan ka dhigay **" Ogolaanshaha"**

**"Sharciga"** Waxaan ka dhigay **"Xeerka"**

Waxaan Guddida ku raacsanahay soo jeedimahoodii, waana xeer aad iyo aad u muhiim ah oo haddii aynu ansixino ay shirkaduhu ka hawlgeli karaan oo shidaalka la soo saaro oo dhiisha farqigana aynu tuurno. Waxaan soo jeedinayaa in xeerka la sixiyo.

**Md Xasan Xuseen Maxamed** **(4min 13sec):-** Bismailaahi raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Xildhibaanada sharafta leh, Saxaafada iyo shaqaalaha waan idin salaamayaa, Asalaamu Calaykum Warax matulahi Wa barakaatu.

Salaam ka bacdi. Kama fogi Xildhibaanadii iga horeeyey amaantay u soo jeediyeen Guddi Hoosaadka Khayraadka Dabiiciga ah ee inoo soo diyaariyey xeerkan qiimaha badan leh.

Run ahaantii waxaad moodaysaa markaan dib u eegayey shalay xeer la mid ahi ima soo marin intaan Golaha joogay, waxaan u qaatay xeerka ugu fiican. Rag badan oo aqoonyahan ahi liiska way ku jiraan, markaa waan ku hambalyeynayaa soo diyaarintooda.

Qalad badani kuma jiro xeerkan, laakiin waxa ku badan Wasiirka wasiirka. Waxaad moodaa in Wasaaradii laga tagay oo Wasiirka la qaatay, shaqo kastana wasiirka ayaa ku badan, xeerkii shalayna ee Dekedaha waxa ku badan Madaxweynaha. Markaa awoodii oo dhani waxay ku ururtay wasiirka, markaa shaqsi qudha hawlahaas fulintooda in laga yar balaadhiyo ayaan jeclaan lahaa. Waa in Guddi loo abuuraa ama Wasaarada la yidhaa,laakiin Wasiirka ayaa aad ugu badan. Waxaan odhan lahaa arrinkaa dib ha loo eego.

**Qodobka 7aad farqada 2aad** waxa qoran Golaha Wasiirka ayaa digreetada soo saaraya. Golaha Wasiiradu Digreeto ma leh ee go'aan ayey leeyihiin, waxaan odhan lahaa qodobka in dib loo eego ayaan soo jeedin lahaa.

**Qodobada 8aad, 9aad iyo 19aad** run ahaantii markaan eegay ama qodobka waxaan odhan lahaa iyaga laftooda dib ha loo eego.

**Qodobka 69aad farqadaha 1aad iyo 2aad Guddidu** dib u habayn ayey ku sameeyey oo xeerka is bedel ayaa lagu sameeyey, waxbay ku kordhiyeen oo waxay la xidhiidhay Ganaaxyada oo la xidhiidha shuirkada xeerka ka baxa iyo dunuubyada ganaaxuna aad ayuu u badan yahay. Ganaaxyadii xeerka ku xusnaa kanaa ka balaadhan $500,000, $200,000 lacag u dhigan oo Somaliland ah weeyaan. Siday u dhigeen waa sax, laakiin waxaad moodaa ganaaxyadii kale ee Qolada farsamadu soo diyaarisay inay kan Guddidu aad u badan tahay. Markaa lafteeda dib ha ugu noqdaan aad ayey u badan oo maaha in dadka la eryo oo la fududeeyo ganaaxyadaas aad u badan. Intaas ayaan ku soo koobi lahaa.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------- | -------------------------------------------- |